

Goorma ayay tahay in la i baaro? Xubinta Qoyska ee Xanuunsan

QORAALKA

[muusik qafiif ah]

[Warin]

Goorma ayay tahay inaad iska baarto COVID-19?

Marka qof kamid ah qoyskaaga uu la xanuunsan yahay COVID-19. Uu qofku joogay guriga (keli-yeelid), laakiin aadan ka fogaanayn markaad guriga isla joogtaan.

Talooyinka baaritaanka ayaa sheegaaya in dhammaan xubnaha qoyska la baaro kadib markay la jooheen guriga qof qaba COVID-19.

Qofka xanuunsan wuxuu u baahan yahay inuu guriga joogo uuna ka fogaado dadka kale ugu yaraan shan maalmood (keli-yeelid), waayo wuxuu caabuqa ku faafin karaa dadka kale inta lagu jiro mudadaan. Sidoo kale waa inuu xirtaa maaskaro markuu la joogo dadka kale ee guriga jooga. Wuxuu u baahan karaa inuu guriga joogo muddo intaas ka badan haddii uu wali qabo astaamaha caabuqa, ama haddii uusan awoodin inuu xidho maaskaro.

Booqo webseedkeena Haddii aad Jiran Tahay (<https://www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/sick.html>) si aad u hesho tilmaamaha gaarka ah ee mudada aad guriga joogayso haddii aad qabto COVID-19.

Haddii aad la nooshahay qof qaba COVID-19, waxaad u baahan kartaa inaad gasho karantiil kadib marka qofka jiran dhamaysto mudada keli-yeelida. Booqo webseedka Dadka la joogay qof qaba caabuqa iyo Karantiilka ee MDH si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku aadan xirashada maaskaro markaad la joogto dadka kale iyo mudada aad guriga joogayso: (<https://www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/close.html>)

Dhammaan xubnaha qoysku waa inay isbaaraan shan maalmood kadib marka qofka jiran ka baxo keli-yeelida si loo hubiyo inaysan qabin caabuqa. Markay sidaan dhacdo, maalinta ugu danbaysa ee keli-yeelida xubinta qoyskaaga ayaa ah Khamiista. Dhammaan xubnaha qoysku waa inay isbaaraan shan maalmood kadib, kadib maalinta Talaadada.

Si aad xog dheeraad ah uga hesho waqtiyada kale ee ay tahay inaad isbaarto, iyo meesha aad baarista ka helayso, booqo webseedka Baaritaanka COVID-19 ee MDH.

(<https://www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/testsites/index.html>)

[muusik qafiif ah]

Minnesota Department of Health
Communications Office
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4989
health.communications@state.mn.us
www.health.state.mn.us

2/2/22 (Somali)

Si aad xogtaan ugu hesho qaabab kale, wac: 651-201-4989